



Ka dhigida ardaydeena iyo shaqaalaheena kuwo badbaado qaba

Qoysaska iyo Shaqaalaha Qaaliga ah,

Qalbigaygu wuxuu dareemayaa naxariis ku aadan dhammaan dadkii ay taabatey musiibadii Arbacadii ka dhacday Dugsiga Sare ee Marjory Stoneman Douglas ee ku yaala Florida. Waxaan rabaa in bulshadeenu ogaadaan in aasaaska waxa aan maalin kasta ka sameyno Dugsiyada Dadweynaha Portland ay tahay in jawi waxbarasho oo badbaado leh la siiyo ardaydeena. PPS waxay si joogta ah ugu dadaashaa u diyaarinta ardaydeeda iyo shaqaalaheeda ee sida hab wax ku ool ah oo saameyn leh jawaab looga bixinayo xaaladaha degdega ah.

Iyada oo ay qayb ka ah qorshaha Degmada ee loogu talagalay halista-badan, dugsiyada waxaa looga baahan in ay sanad dugsiyeed kasta sameeyaan laba tababarada layli ee xiritaanka gudaha dugsiya mid la sameeyo xilliga dayrta iyo mid la sameeyo xilliga gu'ga. Halkan waxaa ku qoran jawaabaha laga filayo ardayda iyo shaqaalaha haddii halis degdeg ahi ka jirto gudaha iyo dibadda dugsiya.

Xiritaanka Bannaanka: Adkee ammaanka dibedda

- Ardayda – Ku soo laabta, sii jooga dhismaha dugsiya dhexdiisa. Shaqadii caadiga ahayd ha ka socoto fasalka dhexdiisa
- Macallimiinta – Qof kasta gudaha keena. Hubiya in albaabada dibeddu xiran yihiin. Kordhiya ka warqabka xaaladda. Wax xaadirin sameeya.

Xiritaanka gudaha: Xirida albaabada, deminta nalalka, aan la is arkayn

- Ardayda – Socda. Yaan la idin arkin. Muujiya aamusnaan.
- Macallimiinta – U dhaqaaqa dhinaca fasalka. Xira albaabada. Daboolaa daaqadaha, nalalka demiya. Yaan la idin arkin. Muujiya aamusnaan. Suga jawaab bixiyayaasha xaaladda degdega ah. Wax xaadirin sameeya.

Jawaabta Kooxda: Kooxda xaaladda degdega ah ee dugsiya ee diyaarka ah

- Ardayda – Ku soo noqda fasallada.
- Macallimiinta – Ku soo noqda fasallada. Wax xaadirin sameeya. Kordhiya ka warqabka xaaladda. Shaqadii caadiga ahayd ha ka socoto fasalka dhexdiisa.

Waxaanu sameynay tiro maalgelinta dhanka ammaanka ah ee dugsiyadeena oo ay ka mid yihiin wanaajinta isgaarsiinta, rakibaada nidaamyo lagu kaantaroolayo gelitaanka iyo fiidiyow wax lagula soconayo iyo tiro la kordhiyay oo ah Hay'adaha Ammaanka Dhismaha. Maalgelinta dhanka badbaadada ee dhismayaasheena waxay la sii socon doonaan lacagta deynta ah ee la helay ee 2017-ka. Intaasi waxaa dheer, in dhammaan nidaamyada la raaco ee xaaladda degdega ah sanad kasta la falanqeeyo kaasi oo loogu talagalay dib u eegida qaranka ee habka u fiican ee wax loo qabto.

PPS waxay kor u qaadaa dhaqanka badbaado iyada oo dhiirigelinaysa isla markaana awoodsiinaysa ardaydeena in ay soo sheegaan wax kasta oo iyaga ka dhigaya in ay dareemaan badbaado la'aan. Ardaydu waxay hada iyaga oo magacoodu qarsoodi yahay u soo sheegi karaan [Khadka Talada ee SafeOregon](#), la hadli karaan qof weyn oo la aaminsan yahay, wici karaan Xarunta Wicitaanka Degaanka Multnomah 503-988-4888 ama 911.

Waxaanu sidoo kale si dhow ula shaqaynaa Xafiiska Booliiska ee Portland kaasi oo ah dadaal joogto ah oo lagu ilaalinayo ardaydeena iyo shaqaalaheena.

George Weatheroy, Agaasimaha Adeegyada Ammaanka ee PPS